

ISTICMAAL CODKAAGA ADOO KAGA SOO HORJEEDA DAGAAL IYO CUNSURIYAD, U CODEE XANNANO/BARNEHAGE LACAG LA'AAN AH IYO DHIGISTA AFKA HOOYO.

Sii codkaaga xisbiga Rødt!

Haddii aad codkaaga siiso xisbiga Rødt, waxaad taageeraysaa xisbi:

- Doonaya in qof kastaa xaq u yeesho barashada afka noorwiiijiga lacag la'aan.
- Doonaya in carruurta dhammaan xaq u yeeshaan in afkooda hooyo iskuulka loogu dhigo.
- Doonaya in Noorway qaabisho qaxootiga.
- U taagan in xanaanada/barnehage iyo SFO laga dhigo lacag la'aan.
- U taagan in qaxootiga iyo magangelyo doonka yimaadda Noorway sida ugu dhaqso badan ee suurto gal ah u bilaabaan shaqo ama waxbarsho.
- U taagan in ciidamada Afgaanistaan ka jooga Noorway lagu soo celiyo Noorway.
- U taagan Noorway oo ah waddan qani ah in ay u fidiso caawimo aad-minimo wadamada kale.

Rødt waa xisbi yar , hase ahaatee u taagan mawqifyo muhiim ah. Doora-shadanna fursadayadu aad ayay u fiican tahay in xisbigu kuraas ka helo Go-laha baarlamaanka(Stortinget). Qaar badan oo ka mid ah xisbiyada kale waxay

www.roedt.no

bilaabeen inay ka koobi gareeyeen Fremskrittparti siyasaddiisa qaxootiga ee cunsuriyadda ku dhisan iyo dhaleecaynta islaamka. Xisbiga Rødt waa xisbi raba in la caawiyo dadka qaxootiga ah waxaana aanu ka shqaynaynaa la dagaalanka islaam nacaybka iyo cunsuriyadda.

Musharaxa xisbiga ee Oslo, Erling Folkvord waa nin caan ku ah la dagaalanka musuqmaasuqa ee degmada Oslo. Waana nin caan ku ah gumaysi la dirir. Waxa uu safarro badan ku maray bariga dhexe, xagaagii hadda aan ka soo gudubnayana waxa uu ku sugnaa toban maalmood wadanka Afgaanistaan si uu ugu kuur kalo xaaladda halkaa ka jirta. Erling Folkvord waxa uu culayska saaraa inuu wax ka korodhsado dadka kale. Baarlamaankan waxa uu doonayaa inuu afhayeen u noqdo dadka reer Oslo ee u baahan qof arrimahooda ka hadla.

Xisbiga Rødt waxa uu ku dhiiradaa inuu ka hadlo arrimaha ay xisbiyada kale ka aamusaan. SV waxay yiraahdaan inay ka soo horjeedaan degaalka Afgaanistaan, hase yeeshee waxay baarlamaanka dhexdiisa u codeeyaan degaalka waayo waxay ay dawladda kula jiraan Arbeiderparti oo degaalka taageersan. SV waxay yiraahdaan inay u taagan yihiin siyaasad qaxooti oo binaadmino ku salaysan, laakiin waxay tageeraan Arbeiderparti oo marba marka ka dambeyna sii adkeynaya in sharci lagu joogo Noorway la helo. Xisbiga Rødt waxa uu si cad oon gabasho lahay uga hadlayaa degaalka iyo siyaasadda qaxootigaba.

Xisbiga Rødt waxa uu taageeri doonaa dawladda hadda talisa, waayo waxay aad u dhaantaa dawlad ay Siv Jensen iyo Frp ku jiraan. Hase ahaatee waxanu sii wadi doonaa inaanu sheegno fikirkaayaga kana soo horjedno cadaalad darrada , cunsuriyadda iyo islaam nacaybka.

Cod Rødt la siiyaa waa cod lagula dirirayo cunsuriyadda!



Stem på Rødt!